

Nadiifinta/Sifeynta cayayaanka

Haddii ay dhibaatooyin kaalasoo darsaan cayayaanka waxaad codsan kartaa nadiifin in gurin lagaaga sameeyo. Inta aanad codsanin dalabkaas waxaad tijaabisaa talooyinkagayaga iyo tilmaamaha aan ku siinno. Haddii aad wax is bedel ah dareemi anba arki weydo kadib codso caawimaad farsameed kaasoo ah ina guriga lagaa buufiyo.

Daawooyinka ka hortagga cayayaanka ee aan isticmaalno kuwo ay hey'addo badan oo iswiidhish ah soo qiimeeyeen soona baadheen, iyadoo ah kuwo naloo aqbalay inaan dadka kula talino.

Farsamo-yaqaannadayadu waa kuwo wax barasho iyo takhasus gaar ah u leh hawshooda. Daawooyinkan waa kuwo aad looga soo shaqeeyey iyada oo la eegayo dhibka ay bey'adda kuyeelan karaan.

SVEA Miljö & Hygien waa maamul bey'adeed oo shahaado ka qaadey ISO 14001 (oo ah hey'ad gaar u ah dhibaatooyinka bey'adda kalasoo darsa daawooyinka sunta ah amba kiimikada wata). Taasi oo cadeyneysa ina daawooyinkayagu yihiin kuwo kiimikadu ku yartahay.

Habka looga hortagayo cayayaanku wuu kala duwanyahay waxaa jira siyaabo kala duwan: ina la buufiyo cayayaanka, ina loo dhigo daawo budo ah, in lagu shido qiiq.

Tilmaamo inta aanaan lagaa buufin cayayaanka

Inta aan shaqaalahayagu kuu imaanin waxaad alaabta ka wada gurtaa kabadhada iyo khaanadaha guriga oo dhan. Waxaad ka gureysaa wixii alaab u dhaw darbiga iyada oo loo baahan yahay ina darbiga wax alaab ahi ku tiirsanaanin anba ay qararin. Waxa kale ood warbixin faahfaahsan ka heli kartaa haddii aad soo wacdo qaybta warbixinta ee shirkaddayada, amba waxaad ka heli kartaa warbixin bejka aan ku leenahay shabakadda Internet ka.

Kadib nadiifinta/sifeynta anba buufinta

Farsamayaqaanku wuxuu kusiin doonaa talooyinka marka uu hawshiisa guto. Waxa aad u muhiim ah ina aad talooyinkaas ku

dhaqaaqdo.Marka ay hawsha buufintu dhamaato waxaa muhiim ah in a wixii caruur 2 sanno ka yar,hooyada xaamiladda ah,dadka qaba xasaasiyadda iyo haddii aad leedahay xayawaan sida ey anba bisad,ina gurigaas muddo 24 saacadood ah ayna joogin oo ay meel kale aadaan. Haddii aad leedahay xayawaanka xamaaratada ah ee bogga ku socda iyo kalluun iyagana waxa gurigaas banaankiisa ka joogayaan 36 saacadood.Imaha 2 sanno ka weyn iyo dadka kale ee caafimaadka qaba iyagana 4 saacadood ayay banaanka joogayaan.

Marka uu dhamaado wakhtigii lagu qabtey eed guriga kusoo laabato waxaad ku nadiifisaa meelaha aad hawshaada ku qabsaneyso sida miiska iyo jikada maro nadiif ah oo engeeg ah.Meelaha kale waxaa muhiim in aanad maro qoyan anba biyo ku nadiifin sababta oo ah daawadii ayaa ka maydhmeysa meeshaas,halkaas oo cayayaankii daawada kusumoobi lahaa uu kusoo noqon karo.Daawadu waxay waxtar yeelaneysa muddo 5 asbuuc ah .Intaas wixii ka danbeeya waxaa yaraanaya waxtarkeeda taasi oo saamo ku yeesheen iftiinka iyo hawadu.

Wixii alaab aad kasoo saartey armaajooyinka iyo khaanadaha waad ku celin kartaa meeshooda marka ay daawadu engegto.Meelaha guriga ee la buufiyey waxaad hawada u furi kartaa dhawr jeer maalintii si urta daawadu u baxdo.Waxa aad dareemi doontaa hawl badan oo ka imanaysa dhinaca cayayaanka anba xansharaadka marka guriga la buufiyo kadib.Farsamooyinka aan isticmaalno waxa ay yihiin kuwo tartiib ugu yeelana saameyn xansharaadka,sidaas awgeed waxaa loo baahanyahay in aad samir uyeelatid natiijada.

Haddii dhibka xansharaadku dib kuugu soo noqdo 3 asbuuc kadib buufintii guriga lagu sameeyey waxaad lasoo xidhiidhaa SVEA Miljö & Hygien si aan tallaabooyin kale ugu dhaqaaqno.

SVEA Miljö & Hygien AB

TEL:08-6268350 anba 020-2474500

kundtjanst@sveamiljo.se (waa cinwaankayaga shabakada internetka)

